

## Hagaha Imtixaanada Gobolka ee Waalidka/Daryeelaha

Dokumentigaan wuxuu baxshaa macluumaad aasaasi ah oo waalidka/daryeelaha ku caawiyo inay sameyaan go'aan wargashan oo faa'iideynaayo cunuggooda, dugsigooda iyo jaaliyaddooda.

### Waa maxay sababta loo sameynaayo imtixaanada gobolka?

Minnesota wuxuu qiimeeyaa habkooda waxbarasho iyo aqoon-xirfadeedka Barayaashooda. Barayaasha Minnesota waxay soo saareen heerar waxbarasho adag si uu ardayda ku diyaariyo shaqo iyo jaamacad.

Imtixaanada gobolka ayaa ah habka aan ku qiimeyno in heerarka waxbarasho ay la siman yihiin manhajka iyo waxbaridda dugsiyadeena maalin walba, iyo wuxuu hubiyaa in dhammaan ardayda la siiyo waxbarasho siman. Natiijooyinka imtixaanada gobolka waa hab kale ee lagu ogaado in carruurteena siinno waxbarashada hubin doono inay noqdaan shaqaale xoog leh iyo muwaadiniin aqoon leh.

### Heerarka Waxbarashada iyo Qiimeynta

#### Waa maxay heerarka waxbarashada?

Heerarka Waxbarashada K–12 ee Minnesota waa guulka la filaayo in ardayda oo dhan ee gobolka gaaraan. Waxaa lagu ogaadaa aqoonta iyo xirfadaha ee dhammaan ardayda laga rabo inay ka gaaraan maaddo walba markii ay fasalkooda dhameeyaan. Degmada dugsiya ayaa go'aamiyo sida ay ardayda uu gaari doonaan heerarkaas ayagoo soo saaraayo koorsoyin iyo manhaj.

#### Waa maxay xiriirka ka dhexeeyo qiimeynta tacliinta gobolka iyo heerarka waxbarashada?

Qiimeynta xisaabta, wax aqriska iyo sayniska gobolka waxaa loo isticmaalaa si loo cabbiro haddii ardayda iyo dugsigooda iyo degmadda ay qanciyeen heerarka waxbarashada. Qiimeynta tacliinta waa hab lagu cabbiro sida ay ardayda u bartaan maaddooyinka la baro maalin walba. Xittaa waa hab lagu cabbiro sida dugsiyada iyo degmoyinka u simaan manhajkooda iyo heerarkooda waxbarasho.

#### Qiimeynta Buuxda ee Minnesota (MCA) iyo Baaritaanka Xirfadaha Tacliineed ee Minnesota (MTAS)

- Ku salaysan Heerarka Waxbarashada Minnesota
- Imtixaanka wax aqriska iyo xisaabta waxaa sanad walba la siiyaa dadka dhigto fasalada 3–8 iyo dugsiya sare iyo imtixaanka sayniska waxaa la siiyaa dadka dhigto fasalada 5, 8, iyo dugsiya sare
- Ardayda badankooda waxay sameyaan imtixaanka MCA
- MTAS waxaa la siiyaa ardayda qabo naafonimo wax garasho aad u xun

#### ACCESS iyo ACCESS ka duwan ee loogu talagalay dadka barto Ingiriis

- Ku salaysan Heerarka Horumarka Luqada Ingiriiska ee WIDA
- La siiyo sanad walba dadka dhigto fasalada K–12 iyo barto aqriska, qoridda, dhegeysiga iyo ku hadalka Ingiriiska
- Badanaa dadka barto Ingiriis waxay sameyaan imtixaanka ACCESS ee ELLs
- Imtixaan ACCESS ee ELLs ka duwan ayaa la siin karaa dadka barto Ingiriis iyo qabo naafonimo wax garasho

## Waqti intee la eg ayaa loo isticmaalaa imtixaanada gobolka?

Imtixaanada gobolka waxaa la sameyaa hal mar sanad walba; ardayda badankooda waxay imtixaanka ku sameyaan internetka. Qiyaas ahaan, waqtiga loo isticmaalo sameynta imtixaanada gobolka wuxuu **ka yar yahay boqolkiiba hal ee waqtiga wax baridda** sanad-dugsiiyeedka. Imtixaanada ma ahan kuwo waqti go'an lagu dhameeyo iyo ardayda waxay u qaadan karaan waqtiga ay rabaan.

## Gormee ayey ardayda sameyaan imtixaanada?

Dugsi walba wuxuu qaban-qaabiyaa jadwalka imtixaanada, ayagoo raacaayo xilliga imtixaanka uu soo dejiyey Gobolka. La xiriiir dugsiga cunuggaaga si aad ka hesho macluumaadka maalmaha imtixaanka gaar u ah.

- Xilliga imtixaanada MCA iyo MTAS waxay bilowdaan Maarso iyo waxay dhamaadaan bisha Maay.
- Xilliga imtixaanada ACCESS iyo kuwa ACCESS ka duwan ee ELLs waxay bilowdaan gabagabada bisha Janaayo iyo waxay dhamaadaan bisha Maarso.

## Waa maxay sababta ay qiimeyntaan waxtar u leedahay?

Gobolka Minnesota wuxuu aaminsan yahay in sidii si waxtar leh loo cabbiro wixii uu ardayga bartey, loo baahan yahay in imtixaanka ahaadoo mid ka badan ka jaawaabida su'aalo xulasho kala duwan leh.

- Si ay su'aalaha imtixaanka ka jawaabaan, ardayda waxay u baahan doonaan inay soo qoraan jawaabaha, soo jiidaan iyo geliyaan ereyoyin, ama isku dubaridaan garaaf ama macluumaad.
- Imtixaanada wax Akhriska iyo Xisaabta ee MCA waa kuwo isbeddelo, macnaha waxaa weeye, jawaabta uu ardayga baxsho ayaa go'aamin doono su'aasha xigta la weydiin doono ardayga.
- Imtixaanka Sayniska ee MCA waxaa ku jiro tijaabin, waxaa ardayga laga rabaa inuu sameeyo tijaaboyin si ay uga jawaabaan su'aalaha.

Dhammaan kuwaan waxay ardayga siiyaan fursad ay ku isticmaalaan fekerka muhiimka u ah in lagu guuleysto jaamacadda iyo shaqada iyo muujiyaan waxay yaqaanaan iyo samayn karaan.

Inkastoo imtixaanka sida ugu suurtoagal badan matalo heerarka, isku diyaarinta iyo sameynta imtixaanka wuxuu isticmaalaa isla aqoonta, hab-socodka, iyo istaraatiijiyadalaga isticmaalo fasalada ugu fiican.

## Goormaan heli doonaa natijada imtixaanka cunuggayga?

Xagaag walba, waxaa degmoyinka dugsiyada loo diraa Warbixinta Shakhsiyeed ee ardayga, kaasina waxaa qoysaska loo gudbiyaa waqti aan ka dambeyn shirarka xilliga dayrta. Warbixinta waxaa loo isticmaali karaa si lagu ogaado horumarka cunuggaaga iyo wuxuu hage u ahaan karaa waxbarashada mustaqbalka.

## Maxaa dhacaayo haddii aan go'aamiyo in cunuggayga ka qayb qaadanin imtixaanka?

Shardiyada Minnesota waxuu MDE ku qasbayaa inay soo daabacaan foom oo waalidiinta/daryeelayaasha laga rabo inay soo buuxiyaan haddii ay diidaan in cunuggooda ka qayb galo imtixaanada jaango'an. Foomka lagu qanciyo shardiyadaan waxaa laga heli karaa bogga internetka MDE, isku xirka hoose. Degmada dugsigaaga wuxuu u baahan karaa macluumaad dheeraad ah.

## Halkaan ka heli karaa macluumaad ka badan?

Macluumaad faah-faahsan ku saabsan imtixaanada gobolka ee ku socda ardayda iyo qoysaska waxaad ka heli kartaa [Bogga internetka MDE ee Imtixaanka Gobolka](http://Bogga internetka MDE ee Imtixaanka Gobolka) (education.state.mn.us > Students and Families > Statewide Testing).

## Waa maxay sababta uu ka qayb-galka muhiim u yahay?

Qiimeynta gobolka waa hal hab kaliya ee lagu qiimeeyo guulka cunuggaaga, laakiin ka qayb galka cunuggaaga ayaa muhiim u ah in lagu ogaado sida uu waxbarashada dugsiga ardaygaaga uu si wax ku ool ah la siman yahay heerarka waxbarashada.

- Macalimiinta iyo siyaasad-dejiyeyaasha waxay isticmaalaan macluumaad ay ka helaan qiimeynta si ay go'aan ka gaaran iloyinka iyo taageerida loo baahan yahay in la baxsho.
- Waalidiinta iyo shacbiga waxay qiimeynta u isticmaalaan si ay is-barbardhigaan dugsiyada markii ay go'aan ka gaaraayaan meesha ay guri ka iibsan doonaan ama dugsiga ay ku diiwan-gelin doonaan carrurtooda.

La xisaabtamka mas'uuliyadda dugsiga ayaa waxyeelo xun gaari karo haddii in ka yar 95% ee arday ka qayb qaataan imtixaanada.

*Xiriirka xoogga leh ee lala leeyahay heerarka waxaa loola jeedaa in "baridda imtixaanka" uu dhab ahaan yahay wax diiradda saarayo heerarka waxbarasho oo hore qayb ka ahaa wax-barashada maalin kasta.*